
May, 2017

Dhagax-dhadhaabeedka dhismaha (Granite)

Qeexmo ahaan, waxan oran karnaa; “Waa dhadhaabo-shiileed (Igneous rocks) leh midab yara khafiif ah, iyo xabuub (Grains) ku filan ooy arki karaan indhaha qofka caadiga ah”


Waxay ka samaysmaan qurubowga magmada kujirta dhulka hoostiisa. Waxayna ka isugu jiraan isku-dhaf macdaneed ooy kamid yihiin, macaadinta laga sameeyo dhalooyinka, saacadaha (quartz), macaadinta dhalaasha ee aalaaba ka samaysan Aluuminiyam silikeyt. Iyo sidoo kale macaadin kale ooy Mica iyo amphibole kamid yihiin. Inta badanna qoofalkaasi garanayt-ka wuxuu siiyaa midabada casaanka, cadaanka, dameeriga iyo weliba bunniga.





Garanayt, waa midka ugu caansan ee dhagxanta dhadhaabo-shiileedda laga helo dusha saree dhulka. Caansanaan ta waxaa ugu sabab ah, tira-badnida gooraha ay dhaayaheenu arkaan maalin walba. Tusaale ahaan: marmarka sagxadaha guryaha iyo sidoo kale midka lagu gabagabeeyo jaranjarooyinka… Adeegsigeeduna kumanaan sano ayuu feer-socday taariikhda dhismaha. Oo waataa buundooyinka iyo daaradaha guryaha ba loo isticmaalayay, weliba iyagoo si qurxoon loo qorqoray.

Dhagaxani waa mid aad looga yaqaan aagagiisa, gaar ahaan Maraykanka gudihiisa waxaa si fiican looga helaa gobollada Georgia, Colorado, California iyo weliba dooxada Yosemite. Haddaba, si aan isula fahanno isku-dhafka macdaneed eey garanayt iyo macaadin kale ba ay ka samaysanto, dhowr sawirkan hoose.



Qurubyada qarshooyinka ahee waaweyn eey garanayt-ku ka kooban tahay, waa cadaynta ugu hillanka culus ee muujinaysa, inay ka-samaysantay dhagxan dhalaalsan oo gucunka hoosee dhulka ku qabowday. Qaboobiddaasi maahan tu dheel-dheel ah, ee waa mid waqti dheer qaadatay.

Dhulka meelaha ay ku gedaaman yihiin garanaytka dhalan-rogmatay, dhadhaab-lakabeedda (sedimentary rocks)… Garanayt-ku waxay kujirtaa ubucda hoosee gibilladaa.

WQ: Barkhad Cabduqaadir Awcali